

1

MIISAANIYADDA QOFKA (Personal Budget)

Miisaaniyadaadu waa lacagta loo qorsheeyay in lagu bixiyo daryeelkaaga iyo taageerada aad u baahantahay marka la qiimeeyo lacagta ku baxaysa daryeelkaaga.

Lacag Bixin Toos Ah (Direct Payment)

Marka la isla ogolaado lacagta ku baxaysa daryeelkaaga, waxaad dooran kartaa in lacagta adiga aad toos u maamusho lacagta oo dhan ama qayb ka mid ah lacagta si toos ah. Marka lacagta adiga laguu dhiibo bixinteeda waxaa kuu suurto gal ah inaad doorato sida aad rabto inaad u hesho daryeelkaaga.

Kaadhma Lacagta lagu sii shubay- Akoonka Lacag bixinta tooska ah ee Bristol (Pre-paid card Bristol Direct Payment account) BDPA

Si lagaaga caawiyo qorshaha inaad adigu lacagta daryeelkaaga maamusho, waxaa laguu soo diri doonaa kaadh u sheqeeya sida kan bangiga oo ku xidhan akoonka ay ku jirto lacagta daryeelkaaga loogu talo galay. Kaadhdhan waakaadhka bangiga oo kale, laakiin lacagta akoonka ku jirta ka badan kama saari kartid waayo looguma talo galin inuu dayn ku sii siiyo.

Qiimayn Lacageed (Financial Assessment)

Waxaa la qimayn doonaa xaaladaada dhaqaale si loo ogaaado in lagaa rabo inaad qarashka ku baxaya daryeelkaaga wax ka bixiso iyo in kale.

Cidda kaa caain karta sidii aad u maamuli lahayd lacagta daryeelka ee toos laguu siiyo (Direct Payment support provider)

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo sidii aad u maamuli lahayd lacag bixin toos ah, Magaalada Bristol yaa kaa bixin doonataa wixii ku baxa cidda kaa taageerta lacag bixinta. Waxay kaa caawin karaan inaad qorato gacan yare

ama caawiye, kaalana taliyaan masuuliyadaada iyo bixinta mushahaarooyinka. Waxay kale oo kuu furi karaan Akoon lagaa caawiyo maamulkiiisa la xidhiidha lacagta soo gasha iyo tan ka baxda.

2

Kalkaaliye ama Gacan yare (personal assistant)

Kalkaaliye waa qof aad shaqaalaysiisan karto oo aad rabto inuu ka shaqeeto daryeelka iyo taageerada aad u baahan tahay oo waafaqsan sida ku cad qorshahaaga daryeel.